

Barnaamij cusub oo u oggolaanaya shaqaalaha Oregon inay u qaataan fasax mushaar leh qaar ka mid ah wakhiyada aadka muhiim ugu ah nolosha ee saameynaya qoysaskeena, caafimaadkeena, iyo badbaadadeena.

- 👉 **Fasaxa Qoyska** – si loo daryeelo xubin qoyska ka mid ah oo qaba jirro ama dhaawac halis ah, ama ku dhawaanta ilmo cusub marka uu dhasho kadib, ilmo la korsaday, ama ku meelaynta daryeelka korinta.
- 👉 **Fasaxa Caafimaadka** – inta lagu jiro xaaladda caafimaadka qofka ee daran.
- 👉 **Fasaxa Badbaadada** – loogu talagalay dhibanayaasha ka badbaaday faraxumaynta galmada, rabshadaha qoyska, dhibaataaynta, ama dabagalka.

Ma awoodaa inaan isticmaalo macaashka **fasaxa mushaarka leh haddii qoyskeyga jiran yihiin ama dhaawacmaan?** Haa. Waad daboolan tahay si aad u daryeesho xubin ka mid ah qoyskaaga ee jiran ama dhaawacmay.

Yaa loogu tiixgaliyaa qoyskeyga ahaan barnaamijka fasaxa mushaarka leh?
Qof walba kugu dhaw dhiig ahaan ama qof kula leh xiriir la mid ah qoys ahaan.

Goormaan codsan karaa macaashka? Sitembar 2023.

Immisa fasaxa mushaarka leh ayaan awoodaa inaan helo?

12 toddobaad/usbuuc ee ah fasaxa mushaarka leh sanadkiiba, lagu daray labo toddobaad/usbuuc oo dheeraad ah ee xadidaada la xiriira uurka. Wuxaad u isticmaali kartaa fasax mushaarka leh hal maalin-shaquo wakhti kasta ama maalmo isdaba joog ah.

Immisa oo lacag ah ayaan heli doonaa?

Shaqaalaha badankood waxay heli doonaan 100% oo beddelka gunnadooda ah. Qiimaha macaashkaaga waxay ku saleysan tahay celceliska gunnooyinkaaga ee sanadkii hore. Macaashka ugu yar ee toddobaalaha ah ayaa noqon doona qiyaastii \$57, oo macaashka ugu sarreeya ee toddobaadlaha ah ayaa noqon doona qiyaastii \$1375.

Waa maxay shuruudaha si loo qaato macaashka fasaxa mushaarka leh?

Shaqaalaha codsanaya macaashka fasaxa mushaarka leh waa inay:

- ➡ La kulmeen dhacdo u qalanta
- ➡ Buuxiyeen codsicodsi
- ➡ Kasbadeen \$1,000 gunno ah sanadkii la soo dhaafay
- ➡ Wax ku darsadeen sanduuqa malgelinta fasaxa mushaarka leh iyadoo laga jarayo jeegooda-mushaarka

Goorma ayaan ogeysiyyaa loo-shaqeeyahayga inaan damacsanahay inaan qaato fasax mushaarka leh? Haddii aad ogtahay inaad u baahan tahay inaad qaadato fasax mushaar leh, waa qasab inaad ku ogeysiisaa loo-shaqeeyahaaga ugu yaraan 30 maalmood ka hor intaadan fasaxa qaadan. Haddii aad u baahatid inaad qaadato fasax aan la filayn, waa inaad siisaa ogeysiis afka ah 24 saacadood gudahood markaad bilowdo fasaxaaga iyo aad siiso ogeysiis qoraal ah seddex maalmood gudahooda ka dib markad bilowdo fasaxaaga.

Shaqaalahee ayuu daboolaya Fasaxa Mushaarka leh ee Oregon?

Shaqaalaha badankood ee ka shaqeeya Oregon way ku daboolan yihiin barnaamijka fasaxa mushaarka leh. Dadka mushahaarka qaata, saacadlaha ah, wakhtiga buuxa, ama wakhtiga dhiman way daboolan yihiin dhammaan.

Shaqaalahee ayuu daboolney Fasaxa Mushaarka leh ee Oregon?

Dadka aan ku daboolney fasaxa mushaarka leh waa:

- ▶ Shaqaalaha federaalka
- ▶ Shaqaalaha maa'mulka qabaa'ilka
- ▶ Dadka iskood u shaqeysta ama qandaraasleyaasha madaxa-bannaan
- ▶ Shaqaalaha ka shaqeeya keliya banaanka Oregon

Haddii aanan u qalmin daboolida Fasaxa Mushaarka leh ee Oregon, ma dooran karaa inaan ku biiro barnaamijka?

Maamulka qabaa'ilka waxay dooran karaan inay kaqaybqaataan barnaamijka fasaxa mushaarka leh, oo shaqaalahooda waa la dabooli doonaa. Dadka iskooda u shaqeysta ama qandaraasleyaasha madaxa-bannaan waxay sidoo kale dooran karaan inay ku biiraan barnaamijka fasaxa mushaarka leh.

Sidee buu barnaamijka Fasaxa Mushaarka leh ee Oregon uga duwan yahay Xeerka Fasaxa Caafimaadka ee Qoyska (Family Medical Leave Act – FMLA) iyo Xeerka Fasaxa Qoyska ee Oregon (Oregon Family Leave Act – OFLA)?

Hoos waxaa ku qoran soo koobis ku saabsan kala duwanaanta u dhixeeysa barnaamijka fasaxa mushaharka leh iyo FMLA/OFLA. Barnaamij kasta wuxuu leeyahay xeerar badan wuxuuna noqon karaa mid adag. Fadlan la shaqee wakiilkaaga kheyraadka aadanahawaaxda shaqaalaha (HR) si aad u go'aamiso barnaamijkee sida ugu wanaagsan ugu habboon baahiyahaaga.